



Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

WARSAXAAFADEED 011/2011

Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay oo u hambalyeyay Ra'iisal Wasaaraha cusub

Nayroobi, 23 Juun 2011 – Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ee Soomaaliya oo ah madaxa Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS), Dd. Augustine P. Mahiga, ayaa ugu hambalyeyay Md. Cabdiweli Maxamed Cali magacaabiddii loo magacaababay inuu noqdo Ra'iisal Wasaaraha cusub ee Soomaaliya. Wuxuu ku ammaanay Madaxweyne Shariif Sheekh Axmed sida uu ugu dhaqaaqay tallaabada magacaabidda Md. Cabdiweli waqtiga ku habbon wuxuuna ku ballanqaaday in Qaramada Midoobay ay taageero buuxda siin doonto lana shaqeyn doonto Ra'iisal Wasaaraha cusub.

Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud Mahiga wuxuu ku hanweynyahay in la magacaabo Golaha Wasiirada cusub iyo in Baarlamaanka Federaalka KMG uu ansaxiyo Ra'iisal Wasaaraha iyo Golaha Wasiiradaba. Wuxuu ku celiyay muhimadda ay leedahay in dhammaan dhinacyadu ay wada shaqeeyaan si loo hirgeliyo hawlahu mudnaanta leh ee ay ka midyihii dhammeystirka dastuurka, dibuhabeynta hay'adaha dowladda, sare u qaadidda amaanka iyo dhisidda hay'adaha amaanka qaranka, sii wadidda dibuheshiisiinta, sare u qaadidda isla xisaabtanka iyo dibuhabeynta adeegyada maamulka iyo bulshada ee asaasiga ah si loo xaqijiyo xasilloonida goobihii laga xoreeyay kooxaha hubaysan.

Hay'adaha Federaalka KMG iyo wakiillada Galmudug iyo Puntland ayaa diyaarinaya qorshe hawleed – iyagoo taageero ka helaya Midowga Afrika, IGAD iyo UNPOS – si loo hirgeliyo hawlahan ee loola jeedo dhammeystirka xilliga galaguurka ah. Qorshe hawleedka waxaa lagaga doodi doonaa Kulun Wadatashi ah oo ay Soomali badan ee arrintu khuseysa isugu iman doonaan bisha soo socota.

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilسان
isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6805 / 6869 ama +254 733902020 ama 737400133

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):

www.unpos.unmission.org